Somali

# Sida Ardayda Loo Qiimeyo

Hagaha Qoyska Cusub

## Qiimeynta fasalka

**Macalinka ardaygaaga ayaa la socon doona oo qiimeyn doona ilmahaaga sida ugu wanaagsan uu u fahmayo waxa la baray. Qiimeyntan ayaa ku saleysnaan doonto natiijada manhajka iyo waxa laga filaayo cunugaaga in uu ku barto fasalkaas.**

Macalinka ayaa siin doona cunugaaga jawaab celin caadiya si uu u fahmo heerka fahankiisa waxa uu sameynayo. Warcelintan waxaa suurto gal ah in ay ku saleysan tahay wada shekeysi lala yeesho cunugaaga, indho-indheynta cunugaaga inta inta uu wax baranayo, iyo agabka uu sameyo cunugaaga si uu usoo bandhigo waxuu bartay. Agabka waxaa kamid noqon karo leyliyada, mashruucda, soo bandhigyada, iyo imtixaanada. Macalinka iyo iskuulka ayaa laga yaaba in ay u isticmaalan xogtan in ay kula socdaan iyo in ay kaga warbixiyaan heerka uu marayo cunugaaga.

**Nuucyada xiriirka warbixin qoyska ee ku saabsan xaalada heerka cunugaaga ee iskuulka.**

- La sheekeysiga macalinka
- faalloyinka, heerarka la gaaro, natiijoyinka, iyo boqoleyda imtixaanada iyo shaqooyinka tusaallaha
- warbixinta lagula wadaagayo "Bogga Ardayga-Waalidka ee PowerSchool," taas oo loo isticmaali karo in lagu helo qeybta "Ardayda & Waalidiinta" ee boggeena. Ardayda & Waalidiinta | Waxbarashda Kobaca Caruurta Yaryar ee  (ednet.ns.ca).

Waxii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan xiriirka wadahadal, eeg Hagaha Qoyska Cusub "How to Communicate with Your Child's Teacher and School."

# Kaarka Ribootka Warbixin

## Iskuulka-hoose-kahore

**Caruurta iskuulka-hoose-kahore ma helaan kaarka ribootka warbixinta.** Macalinka cunugaaga ee waxbarashada caruurta (ECE) ayaa kula socodsiin doono heerka cusub ee uu marayo cunugaaga. Waxaa laga yaaba in ay kula wadagaan dukumiinti, sida joornalka ama bortifooliyowga, kaas oo sharaxaya heerka uu marayo cunugaaga safarkiisa waxbarasho. ECE waxa ay isticmaali doonta waxii ay ka aragto cunugaaga in ay sameyso qibrad ka caawin doonto in uu sii wado waxbarashada.

## Fasallada Elementariga (Fasallada hoose ilaa 6) iyo dugsi sare (fasallada 7 ilaa 12)

**Ardayda dhigato fasallada dugsi hoose ilaa 12 ayaa hello kaarka warbixinta.** Kaarka warbixinta waxa uu kuu sheegaya sida ay tahay xaallada waxbarasho ee cunugaaga waqtiga la joogo ee sannad dugsiyeedka. Cunugaaga ayaa heli karo kaarka warbixinta koorsada, teeramka, ama simistarka marka ay kala bar marayaan ama dhamaadka koorsada, teeramka, simisterka iyo dhimaadka sannad dugsiyeedka, Xaruntaada Waxabarasho ee Deegaanka (RCE)/Conseil scolaire acadien provincial (CSAP) bogga internetka ayaa lahaan doono kalendarka marka kaarka warbixinta guriga loo soo diri doono..

Kaararka warbixin waxa ay leeyihin labo qeybood:

- Qeybta Xogta Ardayga waxa ay ku siineysa warbixin ku saabsan xirfadaha bulsho ee cunugaaga iyo dabeecadiisa shaqo.
- Qeybta Guullaha Ardayga waxa ay ku siineysa warbixin ku saabsan xirfadaha iyo mowduucyada uu bartay ilmahaaga. Qeybta waxa ay kuu sheegi doonta haddii uu cunugaagu kasoo baxaayo heerka natiijo ee fasalka uu marayo.

## Fasallada hoose ilaa 3

Fasallada hoose ilaa 3, kaarka warbixinta waxa ka mid noqon doono faallooyinka ku saabsan heerka luuqada ilmahaaga ee farshaxanka iyo xisaabta. Madooyinka kale, sida caafimaadka, Tiknoolajiyada iyo Isgaarsiinta (ICT), seyniska, cilmiga bulshada, iyo farshaxanka aragtida, ayaa "ku lifaaqan" farshaxanka luuqada iyo xisaabadka, marka sidoo kale waxaa arki kartaa faalloyinka ku saabsan waxbarashda cunugaaga ee maadooyinkan.

Fasallada 1 ilaa 3, kaararka warbixinta waxaa ka mid noqon doono WD, DE, ND, ama INS:

| | |
|---|---|
| **WD** | fahan isku dheeli tiran iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |
| **DE** | horumarinta garasho ee fahanka iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha |
| **ND** | baahida kobaca fahanka iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha |
| **INS** | cadeymo ku filan warbixinta guusha la filayo iyo natiijada waxabarasho soo baxday |

Teeramka labaad iyo sadaxaad ee kaararka warbixinta waxaa ka mid noqon doono fasallada iyo faallooyinka sida kor ku sharaxan, sidoo kale warbixin ku saabsan horumarka muusiga iyo waxbarashada gacanta.

## Fasalka 4 ilaa 6

Fasallada 4 ilaa 6, kaarka warbixinta waxa ka mid noqon doono faallooyinka ku saabsan heerka luuqada ilmahaaga ee farshaxanka iyo xisaabta. Madooyinka kale, sida caafimaadka, Tiknoolajiyada iyo Isgaarsiinta (ICT), seyniska, cilmiga bulshada, iyo farshaxanka aragtida, ayaa "ku lifaaqan" farshaxanka luuqada iyo xisaabadka, marka sidoo kale waxaa arki kartaa faalloyinka ku saabsan waxbarashda cunugaaga ee maadooyinkan.

**Fasallada 4 ilaa 6 natiijoyinka teeramka kowaad:**

| | |
|---|---|
| **WD** | fahan isku dheeli tiran iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |
| **DE** | horumarinta garasho ee fahanka iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha |
| **ND** | baahida kobaca fahanka iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha |
| **INS** | cadeymo ku filan warbixinta guusha la filayo iyo natiijada waxabarasho soo baxday |

**Fasallada 4 ilaa 6 natiijoyinka teeramka labaad:**

| | |
|---|---|
| **A** | fahan isku dheeli tiran iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |
| **B** | fahanka wanaagsan iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |
| **C** | fahanka assaasiga ah iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |
| **D** | fahanka xadidan iyo isticmaalka waxqabad ee fikradaha iyo xirfadaha |

Kaararka warbxinta teeramka labaad iyo sadaxaad ayaa kamid noqon doono natiijada iyo faallooyinka ku saabsan horumarka Faransiiska (ama luuqada Mi;kmaw ama luuqada Gaelic ee la siiyay), fanka iyo waxbarashada gacanta.

## Fasalka 7 ilaa 12

Fasallada 7 ilaa 12, kaarka warbixinta waxa ka mid noqon doono faallooyinka ku saabsan heerka koorsooyinka uu qaatay. Waxbarashada cunugaaga waxaa sidoo kale lagu sharaxi doona ayadoo la isticmaalayo boqoleydan iyo sharaxaadahan.

| | |
|---|---|
| **90—100%** | Muujiyay fahan heer sare ah iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha la xiriiro natiijoyinkii kasoo baxay waxbarashada. |
| **80—89%** | Muujiyay fahan aad u wanaagsan iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha la xiriiro natiijoyinkii kasoo baxay waxbarashada. |
| **70—79%** | Muujiyay fahan wanaagsan iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha la xiriiro natiijoyinkii kasoo baxay waxbarashada. |
| **60—69%** | Muujiyay fahan lagu qanco iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha la xiriiro natiijoyinkii kasoo baxay waxbarashada. |
| **50—59%** | Muujiyay fahan yar iyo isticmaalka fikradaha iyo xirfadaha la xiriiro natiijoyinkii kasoo baxay waxbarashada. |
| **Ka hooseya 50%** | Kama uusan soo bixin shuruuda ugu yar ee koorsada. |
| **INS** | cadeymo aan ku filneyn warbixinta guusha la filayo iyo natiijada waxabarasho soo baxday. |
| **N/A** | Macalinka ayaa u isticmaala "N/A" marka uu mowduuca "aan lagu qiimeyn" inta lagu jiray xilliga warbixinta. |

**Warbixinta IPP:** Haddii uu ku jiro cunugaaga Qorshe Barnaamijka Shaqsiga (IPP) sidii qeyb kamida qorshahooda, waxaad heli doonta ogeysiis joogto ah ee ku saabsan heerkooda oo dukumiinti gooni ah xili walbo oo warbixin lasameynayo sanad dugsiyeedka.

## Qiimeynta imtixaano gobolka ee fasallada 3, 6 iyo 8

- Imtixaanada gobolka Nova Scotia waxey qiimeyaan aqriska, qoraalka, iyo xirafadaha xisaabta.
- Waxey qimeyaan waxa uu cunugaaga bartay sanadka dugsiyeedka oo dhan, marka ardayda uma baahno in ay u diyaar garowaan imtixaanadan.
- Macalimiinta ayaa taagero misna u diyaariyo ardayda imtixaanadan bisha ka horeyso ilaa xiliga imtixaanka.
- Dhowr bilood kadib marka imtixaanka la qaado, waxaad heli doonta warbixin sharaxeyso sida uu uuga gudbay ilmahaaga imtixaankan. Macalimiinta ayaa u isticmaali karo warbixintan in ay fahmaan heerka uu marayo cunugaaga iyo hadii uu u baahan yahay taagero dheeri ah.
- La qabsiga taagerada waxbarashada fasalka ayaa inta badan la heli karaa inta ay qiimeyntu socoto. Haddii la qabsiga aan loo ogolaan qiimeynta, Kooxda Qorsheynta Ardayga, oo uu ku jiro waalidka/masuulka, ayaa go'aan ka gaari karo sida horay loogu soconayo: ardayga ayaa qori karo asagoo la qabsanin ama aanan la qorin qiimeynta.
- Haddii ilmahaagu uu ku cusub yahay barashada luuqada English-ka ama Faransiiska, waxaa suurta gal ah in aysan u baahan in la qoro qiimeynta.
- Haddii uu leeyahay Qorshaha Barnaamijka Shaqsi ee fanka luuqada ama xisaabta, waxaa laga yaaba in loo baahan in qiimeyn la qoro.

**Si aad waxbadan uuga barato qiimeynta imtixaan ee gobolka:**

- Waxaad la xiriirta macalinka cunugaaga ama booqo Qiimeynta Imtixaan ee Ardayga qeybta bogga Waaxda Waxbarashada iyo Kobaca Caruurta Yaryar.

## Warbixinta goobta lagala-xiriirayo

Waxii warbixin dheraad ah, la xiriir Xarunta Waxbarashada Deegaankaga (RCE) ama Conseil scolaire acadien gobolka (CSAP).

- **Annapolis Valley Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (AVRCE)
- **Cape Breton-Victoria Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (CBVRCE)
- **Chignecto-Central Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (CCRCE)
- **Conseil scolaire acadien provincial** (CSAP)
- **Halifax Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (HRCE)
- **South Shore Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (SSRCE)
- **Strait Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (SRCE)
- **Tri-County Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (TCRCE)
- **SchoolsPlus** isku keeneysa adeegyo kala duwan iyo taageroyin, waxaana ka heli kartaa iskuul walbo oo Nova Scotia

Waxii taagero bulshadaada ah, lasoo xiriir:

- **YMCA Dejinta Iskuulka** – laga heli karo guud ahaan-gobolka
- **YREACH** – laga heli karo dibada Halifax Dowlada Hoose ee Deegaanka (HRM)
- **Immigration Francophone** – laga heli karo Dejinta Shaqaallaha Iskuulka